# Xabsiga Dowladda Hooes ee Seattle

*Ogoow: Macluumaad dheerad ah iyo faahfaahin ayaa laga heli kara  www.Seattle.gov/municipaljail/*

**1 Janaayo, 2013**, Degmada King waxa ay joojin in ay oggolaato in ay ku hooydo labada xabsi ee degmada maxaabiista dambiyadoodu aynaan sidaa u sii weyneyn ee ka yimaadda magaalooyinka degmada. Go'aanka degmadu wuxuu ku khasbaya Seattle iyo dhammaan magaalooyinka kale in ay u sameeyaan qorshe maxaabiisto aynan dambiyadoodu sidaas u weyneyn. Sariiro xabsi ee lagu bedelo waa in ay diyaaryihiin 2013. Seattle waxa iminka ay sii-wadda labo ikhtiyaar sidii ay u heli lahyd baxad ee xabsi cusub. Ugu horeyn, waxa ay la hadlayaan magoolinka dhinaca-bari iyo dhinaca-waqooyi ee ku saabsan dhisida iyo hawl-fulinta xabsi cusub si wada-jir ah, oo go'aan u badantahay in la gaadho dhammaadka Luuliyo. Ta labaad, waxa ay sahminayaan **dhisida xabsi ay iyaku iska leeyihiin**. Meel u wada dhaxaysa waxa ay siinaysa qiyaasti 645 sariirood oo waxa laga yaaba in ay ku taalo Seattle ama Waqooyiga ama Galbeedka Degmada King. Xabsi Seattle oo qudha ah waxa u bahaanyahay qiyaasti 445 saxriirood.

Magaaladu waxa ay goobteeda ka qaab-dhismee qaadanaysa baahiyada Degamda Regional Justice Center (Xarunta Cadaalada ee Gobolada) – oo ah meel daaro gaban leh oo loo tixgeliyo in ay tahay xabsi laga qaab-dhisme qaato. Magaaladu waxa ay aminsantahay in xabsi daaro-gaban uu noqon doono mid kharash dhisme and hawl-fulintiisu yaryahay, oo sido kalana u amni wanagsanyahay maxaabiista iyo shaqaalaha xabsiga. (La taliye ayaa ka warbixin doona Luuliyo suura galka kharashka u dhexeeya). Xabsi-daaro gaban leh waxa uu u baahanyahay ugu yaraan toddoba hektar. Magaaladu waxa markii horey aqoonsatay goobo **qiyaastoodu tahay dhawr hektar, oo u dhow halbowle weyn** oo isla markana **ku yaala dhul loo seereyey ganacsi ama warshadu midkiiba (Magaaladu waxa ay meesha ka saartay seeraha guryaha).** Iyada oo lagu bilaabayo 35 meelood oo suura gala ah, Magaaladu waxa ay falanqaysay goob kasta oo ayna dooratay afar in ay yihiin kuwa la hirgelin karo:
, 11762 Aurora Avenue.
1600 W. Armory Way
Highland Park Way Southwest iyo West Marginal Way,
9501 Myers Way S.

Magaaladu waxa weydiisanaysa jaawab-celin ku saabsan goobaha iyada isticmaalayo fagaarayaal dadweyne oo isdabagooja:
26 Juun – Machinists Hall
12 Luuliyo – North Seattle Community College
26 Luuliyo – South Seattle Community College
30 Luuliyo – Seattle Center Exhibition Hall

Laba shirar dadweyne oo dheeraad ah ee dhammaadka kulaylaha ama bilawga diyarta ayaa jaaliyadda oo ogolaanaysa in ay bixiyaan talaadooda ee ku saabsan qaybta shaqada ee loogu tala galay **bayaanka raad-reebka ee deegaanka.** Dadka degan waxa kale oo ay bixin karan jawaab-celin iyaka oo maraya booga faalada iyo su'aalaha ee www.seattle.gov/municipaljail/. **Ka hore inta aanan la dooran goobti ugu dambeysay, Magaaladu waxa ay qaban doonta dhegaysiyo; kuwas oo la filayo in ay dhacaan qaybta hore ee sannadka soo socoda.**

Tobbankii Sannadood ee la soo dhafay, **Magaaladu waxa ay yaraysay tirada dadka xabsi oo loo taxaabay gelitaanka dambiyo aan sida sii waa weyeyn ilaa 38%.** Sida darteed, xabsig Hase yeeshe, **sharciga gobolka waxa uu bahanyahay waqti xabsi kuwa lagu eedeyey dambiyo aanan sida u sii weyneyn**, sida kuwa lagu eedeyey rabsho guri gudihiisa ah ama mar wax ka badan dambi lagu xukumay inay kaka doorsanaayeen iyaka oo baabuur wadey. Saddexdiidi dalool hal dalool dadka loo diiwaan-geliyey in la xidho horey ay loo siidayey ama laga duway xabsiga laakiinse ka dib ku guul-daraystay in ay yimaadaan maxkamada.  In kasto talantaalida xabsiga ay sameen karto qiyaasta xabsiga, talantaaliyaashaasi ma bedeli karan baahidda mid loo qabo.

**Maxbuuska caadiga ahi waxa ku jira xabsiga 10 maalmood**. Qaar waa la diiwan geliya waxana lagu sii-daaya 48 sacadood gudaheed. Kuwa kale waxa ay xabsi ku jiraan ilaa iyo sannad. Dadka badankiisu sida caadiga ah waxa loo diiwaan-geliya eedeyan dambi aan sida weyeyn  oo la xiriira hanti (sida wax xadida), baabuur kaxeeya iyaka oo kala doorsan, waxyeelo sahalan, rabash guriga ku kooban iyo dhul-dadoow galid amar la'aan.

# Isirada Xulashada Goob

Sannadkan bilowgiis, Magaaladu waxa ay bilowday eeg-eegto goobo suurta geli kara ee loogu tala galay xabsi daaro-gaban. Isirida ugu horeyey waxa ay ahaayeen in goobtu:

- Waa inay ku taala dhul loo seereyey ganacsi ama warshado midkiiba;
- Si fudud ku ogolaanaya in aad ku gaadhi kartid hal-bowlayaal; iyo
- Horey u tahay dhawr hektar, ama la isu keene karo hantiyo ka soo horjeeda.

Wadar dhan 35 goobood aya fuliyey baahiyaadi asaaska aha. Magaaladu ka dib waxa ay daristay goob kasta iyada oo isticmaalaysa isiradan dheeraadka ah:

| | | |
|---|---|---|
| Weynaanta goobta | Meel loo marida goobta | Hab-farsameedka goobta |
| Gaadiidka dadweynaha | Isu dhigmi karida isticmaalida meelaha u dhow | Xaaladaha dhul-farsamaha |
| Tixgelin deegaan | Xaadka dhismaha iminka | Dibbed u tuurka ganacsiga iyo ijaartaha |
| Karashka gadashada | Arrimaha dhisida goobta | |

Falanqaynta ka dib, Magaaladu waxa ay aqoonsatay afar ka mid ah 35 goobeed ee ugu horeyey in ay yihiin in al fulin karo:

- 11762 Aurora Avenue.
- 1600 W. Armory Way
- Highland Park Way Southwest & West Marginal Way,
- 9501 Myers Way S.

# Khadka Waqtiga

Magaaladu waxa ay samaysay khadka waqtiga ee soo socda si ay u furto xabsi cusub 1 Jan., 2013.

- Samaynta ikhtiyaaro goobta iyo aqoonsiga goobta la door-bidayo – Jannaayo 2008 ila rubuca labaad ee 2009
- Dhammaynta suuro-galaka darsid ee Seattle/Magaalooyinka Dhinac-bari – Luulyo 2008
- Malynta kharshka dhammaynta qiimeynta daaraha-gaban vs. daaraha-dheer – Luulyo 2008
- Qabashada fagaarayasha dadweyne ee horey – Juun/Luulyo 2008
- Bixinta qoral qeexaya ogesiis loogu tala galay environmental impact statement (bayaan raad-reebka deegaanka); oo raadinaya faalada dadweynaha – Rubuca saddexaad 2008
- Bixinta qoral environmental impact statement – Rubuca hore 2009
- Raadinta faalo dadweynaha ee qoralka environmental impact statement – Rubuca kowaad 2009
- Ku darida jaawab-celinta dadweynaha ka ugu dambeeya ee environmental impact statement – Rubuc labbaad 2009
- Cadaynta goobta la door-bidey – Rubuca labbad 2009.
- Arkitaktka & naqshada injineernimada – Rubuca labbad 2009 ilaa Marso 2010
- Qiime u tartanka dhismaha shaqada – Marso 2020 ilaa Luuliyo 2010
- Dhisidda – Luuliyo 2010 ilaa Luuliyo 2012
- U diyaar garoowga degidda – Luuliyo 2012 ilaa Disemmbar 2012
- Furitaanka Xabsiga dawladda hoose ee Seattle – Jannaayo 2013